# Sifooyinka Aadanaha ee Quraanka Kariimka ah lagu xusay



Turjumid

**Saadiq Axmed Maxamed**

# Sifooyinka Aadanaha ee Quraanka Kariimka lagu xusay

TURJUME:

Saadiq Axmed Maxamed

© 2026 Qoraaga: SAADIQ AHMED MOHAMED

Buuggan waxaa loo diyaariyey inuu noqdo mid lacag la'aan ah (Free PDF). Qof kasta wuu soo dejisan karaa, wuu akhrisan karaa, wuuna daabacan karaa si uu uga faa'iidaysto.

Lama oggola in buuggan ama qayb ka mid ah loo isticmaalo ujeeddo ganacsi.

Alle ha ka dhigo cilmi nafci leh oo ajar u noqda qof kasta oo akhriya, faafiya, kana faa'iidaysta. Aamiin..

Kismaayo, Somalia.

+252-61-0676813/+252-62-8494043

saadiqahmedm@gmail.com

# MACLUUMAAD BUUGGA

Buuggan yar waa turjumaad Af-Soomaali ah oo laga soo turjumay buugga Carabiga ah ee «صفات الإنسان في القرآن». Buugga asalka ah waxaa lagu daabacay bogga @albetaqasite

Xuquuqda qoraalka asalka ah waxaa leh qoraaga iyo bogga @albetaqasite.

## Hordhac

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Alle, Naxariis iyo Nabadgelyona ha ahaato Nebigeenna Muxammad (NNKH), ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantood.

Buuggan wuxuu soo bandhigayaa qaar ka mid ah sifooyinka **aadanaha** ee uu Qur'aanka Kariimka ahi xusay, isagoo iftiiminaya dabeecadaha wanaagsan ee la ammaanay iyo kuwa xun ee laga digay. Ujeeddada turjumaaddani waa in akhristaha Soomaaliyeed uu si fudud uga faa'iidaysto macluumaadka ku jira buugga, una noqdo mid ka fikira sifooyinkiisa, kuna dadaala wanaagga.

Waxaan Alle ka baryayaa inuu buuggan ka dhigo mid waxtar u leh akhristayaasha, kana yeelo camal suuban oo la iga ajar siiyo.

*Saadiq Axmed Maxamed.*

1. Gaalnimada daran ee Alle loo geysto

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿قُتِلَ الْإِنسَانُ مَا أَكْفَرَهُ﴾

**Aadanaha** gaalka ah waa la lacnaday oo waa la cadaabaye. Maxaa gaalnimo badnaysiiyay?![Cabasa: 17]

2. Aad u quusashada iyo abaal-ka-dhaca (mahadnaq la'aanta) marka laga qaado mid ka mid ah nimcooyinka Alle

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَلَئِنْ أَذَقْنَا الْإِنسَانَ مِنَّا رَحْمَةً ثُمَّ نَزَعْنَاهَا مِنْهُ إِنَّهُ لَيَئُوسٌ كَفُورٌ﴾

**Aadanaha** haddii aan dhadhansiinno nicmo ay ka mid yihiin caafimaad, ammaan iyo waxyaallo kale, dabadeedna aan ka qaadno, wuxuu noqdaa mid aad uga quusta naxariista Alle, kana abaal dhaca nicmooyinkii uu Alle ku mannaystay.[Huud: 9]

3. Xad-gudubka iyo isla-waynida marka uu qofku dareemo isku-filnaansho hanti ama sharaf darteed

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿كَلَّا إِنَّ الْإِنسَانَ لَيَطْغَىٰ ۝ أَن رَّآهُ اسْتَغْنَىٰ﴾

Xaqiiqdii **aadanuhu** wuu xad-gudbaa (wuuna is-kibriyaa), markuu isu arko inuu isku filnaaday ama hodan noqday.[Al-Calaq: 6–7]

4. Waxaa laga abuuray biyo soo booda oo ka soo baxa dhabarka ninka iyo laabta haweeneyda dhexdooda

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

<﴿فَلْيَنظُرِ الْإِنسَانُ مِمَّ خُلِقَ ۝ خُلِقَ مِن مَّاءٍ دَافِقٍ ۝
يَخْرُجُ مِن بَيْنِ الصُّلْبِ وَالتَّرَائِبِ﴾

Haddaba **aadanuhu** ha fiiriyo waxa laga abuuray. Waxaa laga abuuray mani soo boodaysa oo lagu shubo ilmagaleenka, kana soo baxda dhabarka ninka iyo kalxamaha haweeneyda.[At-Taariq: 5–7]

5. Diidmada nicmooyinka Alle, qirashada arrintaas, iyo jacaylka xad-dhaafka ah ee maalka

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿إِنَّ الْإِنسَانَ لِرَبِّهِ لَكَنُودٌ ۝ وَإِنَّهُ عَلَىٰ ذَٰلِكَ لَشَهِيدٌ ۝ وَإِنَّهُ لِحُبِّ الْخَيْرِ لَشَدِيدٌ﴾

**Aadanuhu** Rabbigiis waa ka abaal dhacaa, arrintaasna isaga qudhiisu wuu qirsanyahay. Sidoo kale, jacaylka maalka aad buu ugu daran yahay.

[Al-Caadiyaat: 6–8]

6. Beeninta soo bixidda (Qiyaamaha) dhimashada ka dib

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَيَقُولُ الْإِنسَانُ أَإِذَا مَا مِتُّ لَسَوْفَ أُخْرَجُ حَيًّا ۝ أَوَلَا يَذْكُرُ الْإِنسَانُ أَنَّا خَلَقْنَاهُ مِن قَبْلُ وَلَمْ يَكُ شَيْئًا﴾

**Aadanaha** (gaalka ahi) wuxuu yiraahdaa: “Ma marka aan dhinto ayaa haddana la i soo bixin doonaa anigoo nool?” Miyuusan xusuusanayn in Annagu markii hore abuurnay isaga, isagoo aan waxba ahayn?

[Maryam: 66–67]

7. Abaal-ka-dhaca (inkiridda) iyo ilowga dhibaatadii iyo kadeedkii uu Alle ka bixiyey

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَإِذَا مَسَّ الْإِنسَانَ الضُّرُّ دَعَانَا لِجَنبِهِ أَوْ قَاعِدًا أَوْ قَائِمًا فَلَمَّا كَشَفْنَا عَنْهُ ضُرَّهُ مَرَّ كَأَن لَّمْ يَدْعُنَا إِلَىٰ ضُرٍّ مَّسَّهُ﴾

Markuu dhib taabto **aadanaha**, wuxuu Alle baryaa isagoo jiifa, fadhiya ama taagan. Markaanse ka qaadno dhibka, wuu iska tagaa sidii inuusan weligiisba noogu baryin dhibkii ku dhacay.

[Yuunus: 12]

8. Quusashada iyo rajo-beelka xilliga faqriga iyo dhibaatada

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿لَا يَسْأَمُ الْإِنسَانُ مِن دُعَاءِ الْخَيْرِ وَإِن مَّسَّهُ الشَّرُّ فَيَئُوسٌ قَنُوطٌ﴾

**Aadanuhu** kama daalo baryada khayrka; haddiise shar ama dhibaato taabato, wuxuu noqdaa mid aad u quusta oo rajo beela.

[Fussilat: 49]

9. In lagu kedsoomo Rabbiga Caalamiinta

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿يَا أَيُّهَا الْإِنسَانُ مَا غَرَّكَ بِرَبِّكَ الْكَرِيمِ ۝ الَّذِي خَلَقَكَ فَسَوَّاكَ فَعَدَلَكَ ۝ فِي أَيِّ صُورَةٍ مَّا شَاءَ رَكَّبَكَ﴾

**Aadanow!** Maxaa kaa dhigay mid ku kedsoon Rabbigaaga wanaagga leh, kaas oo ku abuuray, ku fiyoobeeyay, kuna simay, kuuna sameeyey suuraddii uu doonay?

[Al-Infitaar: 6–8]

10. Wuxuu u malaynayaa in looga tegayo si dhalanteed ah (macno-darro), isagoon xisaab iyo ciqaab la kulmayn

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿أَيَحْسَبُ الْإِنسَانُ أَن يُتْرَكَ سُدًى﴾

Ma wuxuu u malaynayaa **aadanuhu** in looga tegayo bilaash (ujeeddo iyo xisaab la'aan)?

[Al-Qiyaamah: 36]

## 11. Bakhaylnimo daran (gacmo-adayg xad-dhaaf ah)

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿قُلْ لَوْ أَنْتُمْ تَمْلِكُونَ خَزَائِنَ رَحْمَةِ رَبِّي إِذًا لَّأَمْسَكْتُمْ خَشْيَةَ الْإِنفَاقِ وَكَانَ الْإِنسَانُ قَتُورًا﴾

Waxaad dhahdaa: Haddii aad hanan lahaydeen khasnadaha naxariista Rabbigay, waad xajisan lahaydeen idinkoo ka baqaya inay idinka dhammaadaan markaad bixisaan. **Aadanuhuna** sidiisaba waa bakhayl.

[Al-Israa: 100]

## 12. Waxaa laga abuuray dhoobo laga soo qaatay dhammaan dhulka oo idil

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَلَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنسَانَ مِن سُلَالَةٍ مِّن طِينٍ﴾

Xaqiiqdii, waxaan **aadanaha** ka abuurnay dhoobo laga soo qaaday dhammaan dhulka oo idil. [Al-Mu'minuun: 12]

13. Asalka abuuristiisu wuxuu ka yimid dhoobo qalalan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَلَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنسَانَ مِن صَلْصَالٍ مِّنْ حَمَإٍ مَّسْنُونٍ﴾

Xaqiiqdii, waxaan **aadanaha** ka abuurnay dhoobo qalalan (oo dhawaaqaysa), lagana soo qaatay dhoobo madow oo isbeddeshay (ur leh). [Al-Xijr: 26]

14. Ku faraxidda nimcada iyo hantida, iyo abaal-ka-dhaca (inkiridda) marka lagu imtixaano masiibo ka dhalatay macaasidiisa

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَإِنَّا إِذَا أَذَقْنَا الْإِنسَانَ مِنَّا رَحْمَةً فَرِحَ بِهَا ۖ وَإِن تُصِبْهُمْ سَيِّئَةٌ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ فَإِنَّ الْإِنسَانَ كَفُورٌ﴾

Haddii aan dhadhansiinno **aadanaha** naxariis xaggayaga ka timid, wuu ku farxaa. Haddiise ay ku dhacdo dhibaato ay sabab u yihiin wixii ay gacmihiisu horay u geysteen, markaas **aadanuhu** waa abaal-laawe (inkiraad badan). [Ash-Shuuraa: 48]

15. Alle wuxuu ku abuuray muuqaalka ugu quruxda badan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنسَانَ فِي أَحْسَنِ تَقْوِيمٍ﴾

Xaqiiqdii, waxaan **aadanaha** ku abuurnay qaabka ugu wanaagsan iyo suuradda ugu quruxda badan. [At-Tiin: 4]

16. Waa mid dood iyo muran badan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿أَوَلَمْ يَرَ الْإِنسَانُ أَنَّا خَلَقْنَاهُ مِن نُّطْفَةٍ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٌ مُّبِينٌ﴾

Miyuusan arag **aadanuhu** inaan ka abuurnay dhibic biyo ah, haddana uu noqday dood-badane cad? [Yaasiin: 77]

17. Wuxuu u malaynayaa in ballaarinta risaqu ay tahay sharaf, cidhiidhintuna ay tahay dulleyn

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿فَأَمَّا الْإِنسَانُ إِذَا مَا ابْتَلَاهُ رَبُّهُ فَأَكْرَمَهُ وَنَعَّمَهُ فَيَقُولُ رَبِّي أَكْرَمَنِ ۝ وَأَمَّا إِذَا مَا ابْتَلَاهُ فَقَدَرَ عَلَيْهِ رِزْقَهُ فَيَقُولُ رَبِّي أَهَانَنِ﴾

**Aadanuhu** marka Rabbigiisu imtixaano oo uu siiyo maal iyo nimco, wuxuu yiraahdaa: “Rabbigay waa i sharfay.” Haddiise uu imtixaano oo uu ku cidhiidhiyo risaqiisa, wuxuu yiraahdaa: “Rabbigay waa i dulleeyey.”

[Al-Fajr: 15–16]

18. Abaal-ka-dhaca (inkiridda) iyo ku gaaloobidda awoodda Alle iyo kalinimadiisa

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَهُوَ الَّذِي أَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ إِنَّ الْإِنسَانَ لَكَفُورٌ﴾

Isaga (Alle) waa kan idin soo nooleeyey, dabadeedna idin dili doona, haddana (Qiyaamaha) idin soo noolayn doona. Xaqiiqdii, **aadanuhu** waa abaal-laawe (inkiraad badan). [Al-Xaj: 66]

19. Dhibka iyo rafaadka la socda nolosha adduunka

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿لَقَدْ خَلَقْنَا الْإِنسَانَ فِي كَبَدٍ﴾

Xaqiiqdii, waxaan **aadanaha** ku abuurnay nolol ay la socoto dhib iyo rafaad uu la tacaalayo inta uu adduunka joogo.

[Al-Balad: 4]

20. Alle u laabashada xilliga dhibaatada iyo abaal-ka-dhaca xilliga barwaaqada

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَإِذَا مَسَّكُمُ الضُّرُّ فِي الْبَحْرِ ضَلَّ مَن تَدْعُونَ إِلَّا إِيَّاهُ ۖ فَلَمَّا نَجَّاكُمْ إِلَى الْبَرِّ أَعْرَضْتُمْ ۚ وَكَانَ الْإِنسَانُ كَفُورًا﴾

Haddii dhib idinku qabsato badda dhexdeeda, waxaad ilowdaan dhammaan waxaad baryi jirteen marka laga reebo Alle. Marka uu idiin badbaadiyo oo idiin soo saaro berriga, waad ka jeesataan xaqa. **Aadanuhuna** waa abaal-laawe (inkiraad badan).

[Al-Israa: 67]

## 21. Alle wuxuu ka abuuray Aadan (cs) dhoobo

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿الَّذِي أَحْسَنَ كُلَّ شَيْءٍ خَلَقَهُ وَبَدَأَ خَلْقَ الْإِنسَانِ مِن طِينٍ﴾

Isaga (Alle) waa kii qurxiyey wax kasta oo uu abuuray, wuxuuna bilowgii abuurista **aadanaha** ka bilaabay dhoobo.[As-Sajdah: 7]

## 22. Gaalnimada iyo abaal-ka-dhaca (inkiraadda) ee muuqata

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَجَعَلُوا لَهُ مِنْ عِبَادِهِ جُزْءًا ۚ إِنَّ الْإِنسَانَ لَكَفُورٌ مُّبِينٌ﴾

Mushrikiintu waxay Alle u nisbeeyeen qayb ka mid ah addoomihiisa, iyagoo sheegay in malaa'igtu yihiin gabdhihii Alle. Xaqiiqdii, **aadanuhu** waa mid aad u inkira nicmooyinka Rabbigiis, inkiraaddiisuna waa mid cad.

[Az-Zukhruf: 15]

23. Alle ayuu baryaa marka dhibi taabato, haddana wuxuu inkiraa nimcadiisa marka uu barwaaqo helo

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿فَإِذَا مَسَّ الْإِنسَانَ ضُرٌّ دَعَانَا ثُمَّ إِذَا خَوَّلْنَاهُ نِعْمَةً مِّنَّا قَالَ إِنَّمَا أُوتِيتُهُ عَلَىٰ عِلْمٍ ۚ بَلْ هِيَ فِتْنَةٌ وَلَٰكِنَّ أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ﴾

Markay dhibi taabato **aadanaha**, wuu na baryaa, Markii aan siino nimco xaggayaga ka timidna, wuxuu yiraahdaa: "Waxaan ku helay aqoontayda darteed." Balse taasu waa imtixaan, hase yeeshee badankoodu ma oga. [Az-Zumar: 49]

24. Argaggax, welwel iyo hunguri badan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿إِنَّ الْإِنسَانَ خُلِقَ هَلُوعًا ۝ إِذَا مَسَّهُ الشَّرُّ جَزُوعًا ۝ وَإِذَا مَسَّهُ الْخَيْرُ مَنُوعًا﴾

**Aadanaha** waxaa lagu abuuray argaggax iyo hanqaltaag badni, Marka dhib taabato aad buu u argaggaxaa, marka khayrhelona wuxuu noqdaa gacan-adayg oo wax ma bixiyo. [Al-Macaarij: 19–21]

25. Waa mid dood iyo muran badan, inkastoo laga abuuray dhibic biyo ah

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿خَلَقَ الْإِنسَانَ مِن نُّطْفَةٍ فَإِذَا هُوَ خَصِيمٌ مُّبِينٌ﴾

Alle wuxuu **aadanaha** ka abuuray dhibic biyo ah, haddana wuxuu noqdaa dood-badane cad. [An-Naxl: 4]

26. Ka tagista adeecidda Alle xilliga barwaaqada, iyo quusta iyo rajo-beelka xilliga dhibaatada

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَإِذَا أَنْعَمْنَا عَلَى الْإِنسَانِ أَعْرَضَ وَنَأَىٰ بِجَانِبِهِ ۖ وَإِذَا مَسَّهُ الشَّرُّ كَانَ يَئُوسًا﴾

Markaan **aadanaha** u nicmeyno, wuu jeestaa oo wuu ka fogaadaa Alle. Haddiise dhib ku dhacdo, wuxuu noqdaa mid quus badan.

[Al-Israa: 83]

## 27. Ku dadaalidda iyo ku halgamidda sameynta wanaagga ama xumaan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿يَا أَيُّهَا الْإِنسَانُ إِنَّكَ كَادِحٌ إِلَىٰ رَبِّكَ كَدْحًا فَمُلَاقِيهِ﴾

**Aadanow!** Waxaad ugu dadaalaysaa xagga Rabbigaa dadaal joogto ah, ugu dambayntiina waad la kulmi doontaa oo waxaad heli doontaa abaalka camalkaaga. [Al-Inshiqaaq: 6]

## 28. Dulmi iyo jaahilnimo

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿إِنَّا عَرَضْنَا الْأَمَانَةَ عَلَى السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَالْجِبَالِ فَأَبَيْنَ أَن يَحْمِلْنَهَا وَأَشْفَقْنَ مِنْهَا وَحَمَلَهَا الْإِنسَانُ ۖ إِنَّهُ كَانَ ظَلُومًا جَهُولًا﴾

Annaga ayaa ammaanada (waajibaadka diinta) u soo bandhignay samooyinka, dhulka iyo buuraha. Way diideen inay xambaaraan iyagoo ka baqaya, laakiin **aadanaha** ayaa xambaaray. Xaqiiqdii, wuxuu ahaa mid dulmi badan oo jaahil ah. [Al-Axzaab: 72]

29. Wuxuu baryaa Alle marka dhibku ku dhaco, markuu nicmo helana wuu illoobaa

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَإِذَا مَسَّ الْإِنسَانَ ضُرٌّ دَعَا رَبَّهُ مُنِيبًا إِلَيْهِ ثُمَّ إِذَا خَوَّلَهُ نِعْمَةً مِّنْهُ نَسِيَ مَا كَانَ يَدْعُو إِلَيْهِ مِن قَبْلُ وَجَعَلَ لِلَّهِ أَندَادًا لِّيُضِلَّ عَن سَبِيلِهِ﴾

Markay dhibi taabato **aadanaha**, wuxuu baryaa Rabbigiis isagoo u laabanaya. Haddiise Alle siiyo nimco, wuxuu illoobaa dhibkii uu hore uga baryi jiray, wuxuuna Alle u yeelaa kuwo uu la simo si uu dadka uga baadiyeeyo jidkiisa. [Az-Zumar: 8]

30. Waa mid muran iyo dood badan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَلَقَدْ صَرَّفْنَا فِي هَٰذَا الْقُرْآنِ لِلنَّاسِ مِن كُلِّ مَثَلٍ ۚ وَكَانَ الْإِنسَانُ أَكْثَرَ شَيْءٍ جَدَلًا﴾

Xaqiiqdii, waxaan Qur'aankan ugu caddaynay dadka tusaale kasta, hase yeeshee **aadanuhu** waa kan ugu muranka badan. [Al-Kahf: 54]

31. Wuxuu jecel yahay inuu xumaanta sii wato

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿بَلْ يُرِيدُ الْإِنسَانُ لِيَفْجُرَ أَمَامَهُ ۝ يَسْأَلُ أَيَّانَ يَوْمُ الْقِيَامَةِ﴾

Balse aadanuhu wuxuu doonayaa inuu xumaanta sii wado, wuxuuna weydiinayaa: "Goorma ayay tahay Maalinta Qiyaamuhu?" [Al-Qiyaamah: 5–6]

32. Ka jeedsashada xaqa xilliga barwaaqada iyo duco badan marka dhibku yimaado

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَإِذَا أَنْعَمْنَا عَلَى الْإِنسَانِ أَعْرَضَ وَنَأَىٰ بِجَانِبِهِ وَإِذَا مَسَّهُ الشَّرُّ فَذُو دُعَاءٍ عَرِيضٍ﴾

Markaan **aadanaha** u nicmeyno, wuu jeestaa oo wuu iska kibriyaa inuu xaqa raaco. Haddiise dhib ku dhacdo, wuxuu noqdaa mid duco badan. [Fussilat: 51]

## 33. Degdeg badan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿خُلِقَ الْإِنسَانُ مِنْ عَجَلٍ ۚ سَأُرِيكُمْ آيَاتِي فَلَا تَسْتَعْجِلُونِ﴾

**Aadanaha** waxaa lagu abuuray degdeg. Waxaan idin tusi doonaa aayaadkayga, ee ha iiga degdeginina. [Al-Anbiyaa: 37]

## 34. Dulmi badan iyo mahadnaq-la'aan

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَآتَاكُم مِّن كُلِّ مَا سَأَلْتُمُوهُ ۚ وَإِن تَعُدُّوا نِعْمَتَ اللَّهِ لَا تُحْصُوهَا ۗ إِنَّ الْإِنسَانَ لَظَلُومٌ كَفَّارٌ﴾

Wuxuu idin siiyey wax kasta oo aad weydiisateen. Haddii aad isku daydaan inaad tirisaan nicmooyinka Alle, ma awoodaysaan. Xaqiiqdii, **aadanuhu** waa mid dulmi badan oo aad u inkira nicmooyinka Rabbigiis.

[Ibraahiim: 34]

35. Waa degdeg badan wuxuu ku hormaraa waxyaabaha, wuxuuna ku dadaalaa inay dhacaan ka hor waqtigooda

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَيَدْعُ الْإِنسَانُ بِالشَّرِّ دُعَاءَهُ بِالْخَيْرِ ۖ وَكَانَ الْإِنسَانُ عَجُولًا﴾

**Aadanuhu** wuxuu baryaa shar sidii uu u baryo khayr. **Aadanuhuna** waa degdeg badan.

[Al-Israa: 11]

36. Daciifnimo marka la eego rabitaannada iyo shahwada

Alle Sarreeye wuxuu yiri:

﴿وَاللَّهُ يُرِيدُ أَن يَتُوبَ عَلَيْكُمْ وَيُرِيدُ الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الشَّهَوَاتِ أَن تَمِيلُوا مَيْلًا عَظِيمًا ۝ يُرِيدُ اللَّهُ أَن يُخَفِّفَ عَنكُمْ ۚ وَخُلِقَ الْإِنسَانُ ضَعِيفًا﴾

Alle wuxuu doonayaa inuu idinka aqbalo toobadda, halka kuwa raaca shahwooyinku ay doonayaan inaad leexataan leexasho weyn. Alle wuxuu doonayaa inuu idinka fududeeyo, waxaana **aadanaha** lagu abuuray daciifnimo. [An-Nisaa': 27–28]

Mahad oo dhan waxaa iska leh Alle Sarreeye. Waxaan Alle Sarreeye ka baryaynaa inuu ka dhigo buuggan mid anfaca akhristaha, kana yeelo camal suuban oo loo aqbalo. Haddii uu ku jiro wax sax ah, waa fadliga Alle Sarreeye. Haddii ay ku jirto qalad ama gaabis, waxay ka timid naftayda iyo Shaydaanka. Alle Sarreeye ayaan ka baryayaa dambi-dhaaf iyo toosin.

وآخر دعوانا أن الحمد لله رب العالمين

"Gabagabada baryadayaduna waa: Mahad oo dhan waxaa iska leh Alle, Rabbiga Caalamka."

# Sifooyinka Aadanaha ee Quraanka kariimka lagu xusay

Buuggan wuxuu soo bandhigayaa qaar ka mid ah sifooyinka aadanaha ee uu Qur'aanka Kariimka ahi xusay, isagoo iftiiminaya dabeecadaha wanaagsan ee la ammaanay iyo kuwa xun ee laga digay.

Saadiq Axmed Maxamed







Qulaasada qisooyinka Nabiyada




Jaceyl kala go'ay




QADAR QURUX BADAN




Fii Caynayki

+252-61-0676813/+252-62-8494043

saadiqahmedm@gmail.com